



Bogaadinta iyo Cabashooyinka



Sidee baan u bixin karaa bogaadin ama cabasho?

Si aad u bixiso bogaadin ama cabasho waxaad awoodaa:

- taleefan u dir Unuga Natiijo celinta ee Adduunka (oo wecitaan bilaash ah leh Australiya gudaheeda) 133 177 inta lagu jiro saacadaha shaqada
- internetka ah ka buuxi foomka natiijo celinta www.immi.gov.au
- warqad u soo qor:
Maareeyaha
Global Feedback Unit
GPO Box 241
MELBOURNE VIC 3001
AUSTRALIA
- si toos ah noogala soo xiriir xafiskayaga kuugu dhow ee DIAC.

Maxaan wax ku bogaadin karaa ama ka caban karaa?

Waxaad bogaadin ka bixin kartaa ama ka caban kartaa weji kasta oo ka mid ah adeegyada la bixiyo ama ay maalgeliso wasaaraddu. Haddii aadan ku qanacsaneyn go'aanka fiisaha waxaa laga yaabaa inaad xaq u yeelato dib u ueegida go'aanka. Waxaad ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah website ka wasaaradda ee ah www.immi.gov.au.

Yaa kale oo ogaanaya cabashadeyda?

Arimahaaga gaarka ah iyo sirtaadaba waa la xushmeynayaa lana ilaalinayaa. Haddii aadan dooneyn inaad bixiso magacaaga, kuma khasbanid inaad bixiso. Haddii aad magacaaga bixiso, laguma takoori doono ama macaamilkayaga ahaan laguguma fursad tiro doono.

Ilaa intee bay qaadaneysaa?

Haddii cabashadaada lagu sameeyo taleefan ama iimel waxaa jawaab inaan helnay ah laguugu soo dirayaa maalin gudaheed waxaana jawaabta laguugu soo dirayaa 10 maalmood oo shaqo gudahood.

Haddii cabashadaada lagu sameeyo warqad aad noo soo dirtey waxaa inaan helnay laguugu soo sheegi doonaa shan maalmood oo shaqo gudahood waxaana lagaaga soo jawaabayaa 20 maalmood oo shaqo gudahood.

Ka waran haddii aan u baahan nahay caawimaad si aan bogaadin ama cabasho u sameeyo Australiya gudaheeda?

Haddii aad u baahan tahay turjubaan waxaad kala soo xiriiri kartaa Adeega Turjumaada Qoraalka iyo Afka (TIS) oo wecitaan bilaash ah 131 450.

Haddii aad maqalka ama hadalka wax ka qabto ama wadhadalka waxyeelo kaa heysato waxaad nagula soo xiriiri kartaa Adeega Ugudbinta ee Qaranka (NRS). Taleefanka qoraalka ah (TTY)

ama dadka modem ka soo wacayaa waxay nagala soo xiriiri karaan NRS lambkeeda wecitaanka bilaashka ah ee 133 677.

Haddii aad u baahan tahay in Hadal Hadal ku Gudbta (SSR) waxaad la xiriiri kartaa Adeega Gudbinta Qaranka (NRS) ee wecitaanka bilaashka ah 1300 555 727.

Maxaan sameyn karaa haddii aanan weli qancin?

Haddii aadan ku faraxsaneyn sidaan wax uga qabaney cabashadaada waxaad la xiriiri kartaa:

- Unuga Natiijo celinta Adduunka waxaanad noo sheegi kartaa sababta
- dhexdhexaadiyaha (Ombudsman) Dawlada dhexe wakhti kasta taleefanka ah 1300 362 072 (kharashka wecitaanka caadiga ah), 9 subaxnimo ilaa 5 galabnimo, Isniinta ilaa Jimcaha ama email ombudsman@ombudsman.gov.au
- xubin ka mid ah Baarlamaanka Australiya.

Xiriiradaha kale ee muhiimka ah

Australiya gudaheeda

Weydiimaha guud ama codsiga macluumaadka waa in lagu soo hagaajiyaa khadka taleefanka weydiimaha guud ee wecitaanka bilaashka ah 131 881 ama gal website kayaga ah www.immi.gov.au.

Weydiimaha Dhalashada Australiya waa in lagu soo hagaajiyaa khadka weydiimaha Dhalashada Australiya ee ah 131 880 ama gal website kayaga ah www.immi.gov.au

Australiya bannaankeeda

La hadal xubin ka mid shaqaalaha Safaaradda kuugu dhow ee Australiya, Qunsuliyada ama Guddiga Sare. Ka eeg tusaha taleefanka degaankaaga ama gal website ka si aad u xaqiijisato faahfaahinta xiriirka ee ah www.immi.gov.au

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan ilaalinta arimahaaga gaarka ah waxaa laga helayaa www.privacy.gov.au

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan baasaboorada Australiya waxaad la xiriiri kartaa Wasaaradda Ganacsiga iyo Arimaha Dibeda (DFAT) www.passports.gov.au, ama taleefan 131 232 (oo bilaash ah Australiya gudaheeda) ama la xiriir Safaaradda Australiya ee kuugu dhow, Qusuliyada ama Hay'ada Sare ee masuulka ka ah eeg: www.dfat.gov.au

Si aad u bixiso bogaadin ama cabasho ku saabsan wax ka mid ah adeegyada wasaarada, fadlan taleefan u dir 133 177 (oo ah wecitaan bilaash ah Australiya gudaheeda) inta lagu jiro saacadaha shaqada, gal website kayaga ah www.immi.gov.au, la xiriir Safaaradda Australiya ee kuugu dhow, Qunsuliyada ama Hay'ada Sare ee masuulka ka ah ee www.immi.gov.au